

بسم الله الرحمن الرحيم

30.08.2012

السلام عليكم ورحمة الله وبركاته

Anigoo ah Maxmed Sharif C/Nuur Sharif Xasan degen Magalada Makkah Al Mukarramah lana degenaabahay Allaha xifdiyee laga soo billaabo April 2008.

Waxaan caddaynaya fatwooyin lagu qoray websiteyada soomaliyeed qaarkood loona tiiriay in uu aabahay fatwooday bishii Ramadan ee lasoo dhaafay 2012 inuusan ahayn war sax ah. Aabahay Sh Sharif C/nuur wax fatwo ah ma uusan bixin laga soo billaabo 2007 sababo xaga caafimadka ah darteed. Su'aalaha iyo fatwooyinka aanan ugudbin jirin mid guud iyo mid gaar ahba illaa iyo waqtigaas aan horay usoo sheegay.

Fatwooyinka la shaaciay oo aad looga shaqeyay isku duba ridkiisa iyo googooyntooda wax cusub ma ahan. Waxay ahayd 2006 waqtigii maxaakimta islamiga ah ka jireen waddanka, sida haddalka loo dhigayana aysan sax ahayn. Sababtoo ah wax badan oo hadalka Sheekha ka mid ahaa waa la gooyey, in badan oo kalana si uusan ula jeedin ayaa loo leexiyay.

Waxaan leeyahay dadka sidaas sameeyay ilaahay ka cabsadaan oo yaysan aabahay oo looga bartay kheyr iyo wanaag sheeg aysan u isticmaalin arrimo gaar ah magaciisa ama fatwooyinkiisa.

Ugu danbeyntii, Cidii faah-faahin dheeri ah u baahan waxey igala soo xiriiri kartaa emailkayga hoos ku xusan.

[maxamedshariifcnuur@gmail.com](mailto:maxamedshariifcnuur@gmail.com)

Wassalamu Calaykum